

POST HOLDINGS, INC.

# A Post For All

**SEBTEMBAR 2023** | ARRINTA #3

## Horumarka Laga Sameeyey Kooxaha Kheyraadka Shaqaalaha

Kooxaha Kheyraadka Shaqaalaha (ERGs) - oo sidoo kale loo yaqaan Kooxaha Khayraadka Ganacsiga (BRGs) - waxay qayb muhiim ah ka yihiin taageeridda dhaqankeena kala duwanaanshaha, sinnaanta iyo ka mid noqoshada. Kani waxa uu ahaa sanad firfircoon oo la hormariyay goobahan firfircoon ee bulshada, iyo sidoo kale kobcinta isku-xirnaanta iyo wada shaqaynta guud ahaan ganacsiga shirkadaha.

Shabakadda Horumarinta Haweenka ee Post Consumer Brands (PCB) waxay horaantii sanadkan door muhiim ah ka ciyaartay caawinta shirkadaha Bob Evans Farms inay bilaabaan BRG-goodii ugu horreeyay. Bishii Febraayo, shaqaalaha shirkadaha Bob Evans Farms waxay isugu yimaadeen si qof ahaan ah iyo si onlayn ah si ay u saxeexaan xeerka cusub ee BRG-ga Haweenka. Kooxda ayaa loo abuuray inay dhaliyaan jawi lagu qaabilayo, lagu awood siinayo, lagu dhiiragelinayo laguna taageerayo haweenka, ka xirfad shaqo ahaan iyo bulshada dhexdeedaba. Intii ay socotay xaflada, CFO-ga Shirkadda Bob Evans Farms Mike McCoy ayaa ka hadlay muhiimada ay leedahay kooxda iyo sida ay raggu uga qeybqaadan karaan.

Haddii kooxahan loogu yeero ERG-yo ama BRG-yo, hadafka ayaa ah in la isu keeno asxaabta si ay wax isaga bartaan oo ay isu taageeraan – waxa waanu samaynaynana waa intaas.

*Kooxda shirkadda Bob Evans Farms waxay ka mahad celiyeen la shaqaynta Kooxda Post Consumer Brands si ay isku kaashadaan inta lagu jiro horumarinta BRG-ga Haweenka. Kooxda PCB waxay wadaageen aqoontooda, sidoo kale waxay soo direen Berry Fruity Pebbles (oo ah sanduuqa Pebbles-kii ugu dambeeyey oo ka muuqda Haweenka Bedrock, oo ku dhinac qoran taariikhda ku saabsan haweenka hormuudka ka ah xirfadahaas). Lagu muujiyey bidix ilaa midig: Devra Cornell, Ciare James, Cassandra Binkley, Marissa Wilson, Amanda Kubinsky, Natalie Ward-Dodson, Yetunde Durodola Anderson iyo Nicole Bainbridge iyo "Bear" oo ku jira tababarka Bob Evans Farms HQ si uu u noqdo eyga mustaqbalka ka shaqeyn doona Canine Companions.*

*(laga sii wado bogga xiga)*

## Bob Evans Farms waxaa loo aqoonsaday Shaqo Wanaagga DEI waxaana u aqoonsaday Machadka Hilibka ee Waqooyiga Maraykanka (NAMI)

Bob Evans Farms waxa lagu abaalmariyay shahaado aqoonsi ah maadaama ay dhistay hab si wanaagsan loo tixgaliyay, la fulin karo oo la cabiri karo si loo fuliyo istiraatiijiyaddeeda DEI.

Aqoonsigan ayaa markhaati u ah shaqada adag ee ay kooxaheennu sameeyeen si ay u xaqiijiyaan in shaqaalaheennu ay dareemaan in la arkay, lana maqlay iyo in lagu dhiirigeliyay inay qabtaan shaqadooda ugu wanaagsan. Dadaalladani waxay sidoo kale naga caawiyaan inaan sii hayno oo aan soo jiidano shaqaale karti leh oo raba inay ka shaqeeyaan shirkad leh dadaallo xooggan oo DEI ah. Waxaan kooxda Bob Evans Farms uga hambaliyeynayaa helitaanka aqoonsigan.






*Shaqaalaha PCB Brian Weiss, Hogaanka Hawlgallada, iyo Denise Jimenez, Iskuduwaha HR-ka, ayaa waxay goobjoog ka ahaayeen bilaabista PCB Pride ee xarunta Campbell Mill ee Northfield, Minn.*



*Brian Foster, oo ah Injineerka Sare ee Dheskitobka ee shirkadda Bob Evans Farms isla markaana ah halyeey ka tirsanaan jirey Ciidamada Badda ee Maraykanka, oo la hadlaya shaqaalaha intii lagu jirey munaasabaddii daah-furka BRG-ga Milatariga iyo Halyeeyada G.*

Bishii Juun, PCB waxay soo bandhigtay PCB Pride, oo ah ERG cusub oo loogu talagalay in lagu kobciyo jawi loo wada dhan yahay oo loo siman yahay, jawigaas oo loogu talagalay shaqaalaha LGBTQ+ iyo xulafada. Iyada oo uu hagayo himilada kor u qaadista u wada dhannaanshaha, ka run-sheegista iyo kala duwanaanshaha, PCB Pride waxay ku billaawatay jawaab-celin aad u wanaagsan oo ka timid shaqaalaha guud ahaan shirkadda. Hogaamiyeyaashu waxay bilaabeen qorshaynta bishii Maarso ee sanadkan waxayna soo bandhigeen ERG inta lagu gudajiray Pride Month iyada oo dhacdooyin furitaanka laga hirgeliyey xarumaha PCB.

Kooxda PCB Pride waxay sameeyeen guddiyo diiradda saaraya wacyigelinta bulshada, dhacdooyinka bulshada iyo isbahaysiyada si kor loogu qaado muuqaalka iyo fahamka LGBTQ+ iyada oo sidoo kale xiriiro laga dhex abuurayo PCB. Aqoonta ay wadaagaan xubnaha J.M. Smucker Pride ERG waxay qiimo ku yeesheen qaabaynta PCB Pride. Bilaabista barnaamijka ee bishii Juun waxay dhalisay ka qaybqaadashada shaqaalaha LGBTQ+ iyo xulafada ee guud ahaan shirkadda - laga soo bilaabo qeybta warshadaha wax soo saarka ilaa shaqaalaha xafiisyada shirkadda. Marka xigta, PCB Pride waxay sii wadi doontaa kobcinta iskaashiyada, agabyada iyo barnaamijyada inta lagu jiro Maalinta Isku Soo-Baxa Qaranka (National Coming Out Day) ee bisha Oktoobar.

Dhawaanahan, shirkadda Bob Evans Farms ayaa waxay si sharaf leh u soo bandhigay BRG-ga Milatariga iyo Halyeeyada. Iyada oo uu hogaaminayo Brian Foster, oo ah Injineerka Sare ee Dheskitobka ee shirkadda Bob Evans Farms isla markaana ah halyeey ka tirsanaan jirey Ciidamada Badda ee Maraykanka, BRG-gan waxa uu horumarin doonaa deegaan/jawi soo dhaweeynaya, awood siinaya, dhiirigelinaya isla markaana taageeraya ciidankeena, halyeeydeena iyo xulafadooda si xirfad shaqo la xiriirta iyo bulshada dhexdeeda. Munaasabadda daah-furka BRG-ga Milatariga iyo Halyeeyada waxaa ka soo qeybgalay in ka badan 50 shaqaale ah, oo ay ku jiraan xubnaha Kooxda Hoggaanka Fulinta. Ruug-caddaayaasha iyo shaqaalaha kale ee ka kala yimid goobaha kale ee shirkadda ayaa sidoo kale uga soo qeybgalay qaab onlayn ah. Dabaaldegga waxaa ka mid ahaa keeg oo ka-qaybgale kasta wuxuu helay calaamadda xuska eyga ee guduud xigeenka ah, maaddaama midabka guduud xigeenka ah uu astaan u yahay midabada isku-dhafan ee dhammaan laamaha ciidamada Mareykanka.

## MA DANAYNAYSAA INAAD SAMAYSO ERG?

*PCB waxay dadka la wadaagtaa qaar ka mid ah fikradaha bilaabista barnaamijyadaas si ay gacan uga gaysato in bulshooyinkan loo keeno guul waarta.*

- **Kooxdee ee haysata caqabado dhanka matalaada ah ayaad rabtaa in aad taageerto?**
- **Yaa noqon doona hogaamiyaha(hogaamiyeyaasha), yaadse soo jeedin lahayd inuu u noqdo Kafaala-qaadaha Fulinta?**
- **Waa maxay himilada, hadafka, yoolalka iyo ujeedada kooxda? Sideese kuwaasi u taageerayaan himilada, hadafka, yoolalka iyo ujeedada shirkadda?**
- **Waa maxay doorarka iyo qaab-dhismeedka la samayn doonaa (hoggaanka, kooxaha shaqada, faahfaahinada kulamada, iwm.)?**
- **Waa maxay agabyada uu ERG-ga uga baahan yahay ururka?**
- **Waa maxay noocyada dhacdooyinka iyo hawlaha la qorsheeyay?**

La xiriir waaxdaada shaqada iyo shaqaalaha (HR) haddii aad xiisaynayso samaynta ERG.

## Shirkadda Bob Evans Farms waxay taageertaa Badqabka Maskaxeed Ee Geesiyaasheenna Milatariga

Si loo sharfo Bisha Wacyigelinta Caafimaadka Maskaxda iyo Bisha U Mahadnaqida Milatari ee bishii Meey ee la soo dhaafay, Shirkadda Bob Evans Farms waxa ay ku dhawaaqday iskaashi ay la yeelatay United Service Organizations (USO, Ururada Adeegga ee Midooway) si ay u taageeraan badqabka maskaxeed ee xubnaha milatariga.

Iskaashigu wuxuu ku dhisan yahay ballanqaadka shirkadda ee ah inay wax u tarto dadka u adeegaya qaranka iyadoo loo marayo barnaamijkeeda Farm Salutes®.

Shirkadda Bob Evans Farms waxay la shaqeeysay cunto kariyaha caanka ah iyo halyeyga Ciidanka Maraykanka Andre Rush si kor loogu qaado wacyiga caafimaadka dhimirka iyo faa'iidooyinka isu keenista dadka iyada oo loo marayo cuntada. Cunto-kariye Rush waxaa lagu yaqaanaa shaqadiisa ah u doodista bulshooyinka militariga iyo adeegyada caafimaadka dhimirka, oo ay ku jiraan samaynta 2,222 buush-aab ee uu maalin kasta sameeyo isaga oo ku sharfaya 22-ka halyeey is-daldalaad ku dhinta maalin kasta.

Iskaashiga shirkadda Bob Evans Farms kala dhaxeeya USO waxaa ka mid ah deeq $125,000 ah iyo kafaala-qaadista USO Chef's Table Experience (Khibradda Miiska Cunto-kariyaha ee USO), taasoo dhacday bishii Meey, halkaas oo uu Cunto-kariye Rush uu ka soo qeybgalay si uu dadka ula wadaago sheekadiisa ku saabsanayd adkeysiga. Munaasabadda saddexdii biloodba mar la qabto ayaa waxay isugu keentaa koox yar oo ka kooban xubnaha militiriga ee hadda shaqada ku jira ah iyo marti-sharaftooda waxayna wadaagayaan casho-sharaf lix-kooras ah oo heer caalami ah, cashadaas oo ay diyaariyeen cunto-kariyeyaal militiri ah oo ka kala socda laama ciidamada xoogga dalka.

"Waxaan naftayda u hibeeyey inaan bulshada u adeego oo aan muujiyo taageeradayda ku aadan caafimaadka iyo badqabka maskaxda ee xubnaha ciidanka ee shaqada ku jira," ayuu yidhi Chef Rush. "Cunto-karinta way i caawisay oo haddii si daacad ah loo hadlana, waxay badbaadisay noloshayda. Way ina mideysaa oo waxay nagu xiriirisaa qoysaskeena iyo asxaabteena. Helitaanka fursad aan ku wadaago waxyaabaha aan xiiseeyo iyo inaan dadka kale ku caawiyo dadaaladan oo kale oo ay wadaan USO iyo Bob Evans Farms ayaa ah sababta aan u sameeyo waxa aan sameeyo."

Iyada oo qayb ka ah iskaashiga USO, laga soo bilaabo Luulyo ilaa Sebtembar xirmooyinka xulka ah ee cashada iyo quraacda ee shirkadda Bob Evans iyo cuntooyinka Suusejka Owens waxaa midabkooda loo bedeli doonaa midabka guduud-xigeenka si astaan loogaga dhigo dhamaan laamaha ciidamada, waxayna ka soo muuqan doonaan loogooyinka Our Farm Salutes iyo USO si kor loogu qaado wacyiga adeegyada loo baahan yahay si loo taageero badqabka maskaxda.



*Shirkadda Bob Evans Farms waxay la shaqeeysay cunto kariyaha caanka ah iyo halyeyga Ciidanka Maraykanka Andre Rush si kor loogu qaado wacyiga caafimaadka dhimirka iyo faa'iidooyinka isu keenista dadka iyada oo loo marayo cuntada.*



# 8 Su'aalood

## oo uu weheliyo Deepashri Khare, Madaxa Xafiiska Maamulka Shaqada iyo Shaqaalaha, 8th Avenue Food & Provisions

### Waa maxay jagadaada/doorka aad ku leedahay 8th Avenue oo waa maxay masuuliyadahaaga ugu waaweyn?

*Ka Sarkaalka Sare ee Maamulka Shaqada iyo Shaqaalaha Ahaan, waxaan hogaamiyaa HR-ka iyo Istaraatiijiyada Shaqaalaha ee ururka waxaana si dhow ula shaqeeyaa kooxda fulinta iyo guddiga maamulka. Waxaan diiradda saaraa qaabaynta istaraatiijiyadaha maareynta shaqaalaha iyo xalalka dhammaystiran oo HR-ka kuwaas oo kaabaya hindisayaasha istiraatiijiga ah ee ganacsiga.*

### Xagee ku soo kortay?

*Waxaan ku soo barbaaray Mumbai, oo ah magaalo aad u mashquul badan oo Hindiya ku taala, waxaana lagu ammaanaa caasimadda dhaqaalaha ee dalka. Waxay la mid tahay magaalada New York maadaama sidoo kale loo yaqaan "magaalada aan weligeed seexan."*

### Waa maxay qaybta ugu fiican ee shaqadaada?

*Qaybta ugu fiican ee shaqadayda waa inaan ka caawiyo dadka iyo ururada inay gaaraan kartidooda buuxda. Waxaan ku raaxaystaa tababarida iyo inaan awoodo inaan saamayn ku yeesho nolosha dadka. Waxaan sidoo kale aad u xiisaynayaa hadafka shirkadeena! Waxaan jeclahay inaan ka mid nahay urur bixiya cunto caafimaad iyo nafaqo leh oo qiimaheeda la awoodi karo.*

### Maxaa casharo ah oo aad ka baratay nolosha oo ku caawiyey?

*Waxaan aaminsanahay in daacadnimo iyo niyad wanaagga ay gacan ka gaysan karaan xalinta xaaladaha adag - ha noqoto wada hadal muran badan leh, ama dhibaato aad isku dayayso inaad xaliso ama fulinta mashruuc adag. Sidoo kale, waxaan ogaaday in qaadashada qaybta aad ku leedahay mas'uuliyadda xaalad dhacday, gaar ahaan marka ay wax qaldamaan, iyo in aad diyaar u tahay inaad aqbasho khaladaadkaaga, ay aad waxtar u yeelan karto. Waxaan ahay qof si weyn u aaminsan in la isu naxariisto oo la isfahmo - anigoo og in qof kastaa uu had iyo jeer isku dayo inuu sameeyo waxa ugu fiican.*

### Waa maxay sababta DEI ay muhiim kuugu tahay?

*Waa wax qurux badan inaan dhammaanteen isku mid nahay oo haddana kala duwannahay; oo ay naga buuxaan fikrado iyo aragtiyo kala duwan! Dhammaanteen waxaan leenahay dareeno iyo shucuuro isku mid ah, waxaana isugu xirannahay si bini'aadinnimo ah. Waxaan jeclahay fikradda ah "Midnimada Dadka Kala Duwan."*

### Sideed u kobcin kartaa ka mid noqoshada?

*Aad ayaan u daneeyaa in qof walba uu yeesho cod la maqli karo. Waxaan ku dhiirigelinayaa kooxdayda iyo dhammaan shaqaalaha inay ka hadlaan fikradahooda aniga oo abuuraya meel ay ku wadaagi karaan jawaab-celintooda, meel ay ku dhiiban karaan ra'yigooda oo ay wax kaga biirin karaan dhaqankeena wadaaga ah. Waxaan ahay hogaamiye dhab ah, waxaanan si furan kooxdayda ula qaybsadaa meelaha aan ka liito. Waxaan jeclahay in aan inta imaado shaqada haddan aan tusaale ahaan u hogaamin karo si dadka kale ay ugu raaxaystaan in ay iyaguna muujiyaan ruuxooda dhabta ah.*

### Maxaad u malaynaysaa inay tahay sifada ugu muhiimsan ee lahaan karo hogaamiye kaqeybgelinta?

*Hogaamiye dadka u simman wuxuu wakhti ku qaadata dhagaysiga aragtiyo kala duwan - xitaa haddii fikradahaas ay ka duwan yihiin tooda. In qof kasta la siiyo fursad uu ku wadaago ra'yigiisa ku aadan go'aanka, kadibna la yeesho wadahadal iyo jawaab celin si loo fahmo sababta go'aanka loo qaatay, waxay muhiim u tahay qof walba inuu dareemo in fikradiisa la tixgeliyey lana ixtiraamay.*

### Waa maxay badeecada aad ugu jeceshahay ee 8th Avenue?

*Way adag tahay in la doorto hal badeeco maadaama aan jeclahay in badan oo ka mid ah badeecooyinkeena. Waxaan ku raaxaystaa subagga lawska, subagga maple almond, granola iyo baastada sarreenka – iyo in kale oo aanan magaawi karin!*



## Post Consumer Brands, Snoop Dogg iyo Master P Partner oo ku shuraakoobay Cereal for Good

Post Consumer Brands waxay iskaashi la gashay Snoop Dogg iyo Master P's Broadus Foods, waxayna iska kaashanayaan siidaynta badarka cusub ee xagaagan: isu-geynta saddex nooc oo cusub oo Snoop cereal ah oo ay ka buuxaan qoraalo dhadhan leh oo ay hor taagan yihiin jilayaal la xasuusan karo. Tani waxay Broadus Foods ka dhigeysaa shirkaddii ugu horreysay ee ay leeyihiin bulshada Madowga ah oo iibisa badar oo haysata heshiis qaybin heer qaran ah.

"Ujeedada Post Consumer Brands waa in aan cuntooyinka macaan ka dhigno kuwo ay heli karaan dhamaan dadka," ayuu yiri TD Dixon, Sarkaalka Sare ee Kobaca Shirkadda, Post Consumer Brands. "Markii Snoop Dogg iyo Master P ay noola yimaadeen fursad ah inaan Snoop Cereal u soo saarno Broadus Foods, isla markiiba waxaa na mideeyey rabitaankeena wadaaga ah ee quudinta dhamaan qoysaska, Hal-ku-dheggeenu waa hadba sida ugu badan ee aan dakhli u kasbano, inaan deeqo u bixino. Waxaan ku soo koray WIC [Barnaamijka Nafaqada Gaarka ah ee Loogu Talagalay Haweenka, Dhallaanka iyo Carruurta] waxaana sharaf ii ah inaan hadda shirkad la leeyahay Snoop oo u adeegta qoysaska danyarta ah. Shuraako la noqoshada Post Consumer Brands ah waxay macno u yeelaysaa ujeeddadayada guud ee ah inaan dhisno xoojinta dhaqaalaha iyo inaan kala duwanaanshiyaha ku soo kordhino dukaamada raashinka ee lagu iibiyo cunnada quraacda ah ee ay leeyihiin dad Madow ah."

Snoop Dogg ayaa raaciyay, "La shaqaynta Post Consumer Brands waxay dammaanad qaadi doontaa tayada ugu sareysa, dhadhan kala duwan iyo badeecada ugu dhadhanka fiican ee laga heli karo suuqa."

Broadus Foods waxay gacanta ku haysaa qeybta suuqgeynta iyo xayaysiinta badeecooyinka nooca Snoop cereal, halka Post Consumer Brands ay soo saarayso badarka, sidoo kalana bixinaysa cilmi baarista iyo horumarinta, iibinta iyo taageerooyinka kale ee saadka.

> "
>
> Ayaa raaciyay, "La shaqaynta Post Consumer Brands waxay dammaanad qaadi doontaa tayada ugu sareysa, dhadhan kala duwan iyo badeecada ugu dhadhanka fiican ee laga heli karo suuqa.
>
> **SNOOP DOGG**

Iibsi kasta oo la iibsado Snoop Cereal, macaamiishu waxay taageerayaan dad daruufaysan maadaama Broadus Foods ay qayb ka mid ah dakhliga ka soo baxa iib kasta ugu deeqdo hay'adaha samafalka ee wax ka qabta hoy la'aanta iyo cunto yarida.

PCB aad ayey ugu faraxsan tahay iskaashigaan iyo saameyntiisa aan la dafiri karin. Wada shaqaynta ka dhaxaysa moguls-yada madadaalada iyo PCB waxa taageeray hamiga la wadaago ee ah quudinta qoysaska iyo xoojinta bulshooyinka kala duwan. dhisitaanka kala duwanaanshaha iyo horumarinta dhaqaalaha iyo u adeegida bulshooyinka.

Waxaan ku faraxsanahay inaan shuraako la noqono shirkad ay ka go'an tahay u adeegista qoysaska iyo bulshada si la mid ah shirkadeena." Master P ayaa sheegtay, "Waxaan rabnaa inaan xaqiijino in carruurta ay heli karaan quraac heer sare ah.




*Calvin "Snoop Dogg" Broadus oo haya sanduuqa badarka cusub ee Snoop Cereal, iyadoo lala kaashanayo Post Consumer Brands.*

KAFAALA-QAADISTA:

## Post Holdings iyo Hawgallada Cilmi-baarista Cuntada

Operation Food Search

Post Holdings waa kafaala-qaade ku faana Operation Food Search (OFS, Hawgallada Cilmi-baarista Cuntada), oo ah hay'adda kaalmada gaajada oo bixisa cunto bilaash ah, wax ka barashada nafaqada iyo barnaamijyo hal-abuur leh oo wax looga qabanayo cunto yarida. Hadafka OFS waa in ay wax ka qabato gaajada iyadoo la isticmaalayo xalal hal-abuur iyo iskaashi leh kuwaas oo bixiya cunto maanta isla markaana gacan ka geysta abuurista gaajo-la'aanta berrito. OFS waxay awood siisaa qoysaska waxayna kordhisaa marin u helka cunto caafimaad leh oo qiimaheeda la awoodi karo.

Post Holdings waa kafaala-qaadaha sanadkan maalgelinaya OFS's Feast for Change, oo ah munaasabada lacag ururinta ee sanadlaha ah. Munaasabadani waxay isku keentaa dadka si ay wax badan uga bartaan siyaabaha ay OFS u shaqeyso si ay u wax uga qabato gaajada una awood siiso qoysaska si u gurigooda ugu helaan cunto.

CUNTOOYINKA OFS

**200,000+**

**dadka marka loo eego bishiiba (1/3 ay yihiin carruur)**

QEYBINADA

**$30M**

**qiimaha cuntada iyo waxyaabaha daruuriga ah ee sanad walba**

ILAA

**330**

**hawlgalayaal bulsho oo ku sugan 40 degmo oo Missouri iyo Illinois**

Shaqaalaha xafiiska shirkadda St. Louis ayaa had iyo jeer mutadawac ka noqda dhacdooyinka baakadaynta cuntada ee lagu sameeyo bakhaarka OFS iyo xafiiska labadaba.

## Post Consumer Brands waxay ku biirtay Kooxda Women in Manufacturing (Haweenka Wax Soo Saarka Leh)

wim | women in manufacturing®

Tobankii sano ee la soo dhaafay, Women in Manufacturing (WiM, Haweenka Wax-soo-saarka) ayaa kobcay oo noqday ururka ganacsi ee kaliya heer qaran iyo heer gobol ah ee u heellan bixinta taageerada sannadka oo dhan ah ee haweenka doortay xirfadda warshadaha wax soo saarka.

Post Consumer Brands waa mid ka mid ah xubnaha ugu cusub ee WiM waxayna wadaagaan himilada WiM ee ah in la taageero, la kobciyo lana dhiirageliyo haweenka ku jira shaqooyinka shirkadaha wax soo saarka. WiM waxay fulisaa himiladan iyada oo agabyo xoog badan, waxtar leh oo la xaqiijiyay u gudbinaysa haweenka ka shaqeeya warshadaha wax soo saarka iyo shirkadaha shaqaaleysiiya haweenkaas.

WiM waxay ka kooban tahay soosaarayaasha nooc kasta leh waxayna soo dhawaynaysaa shakhsiyaadka ka socda shaqo xirfadeed kasta – laga soo bilaabo shaqooyinka wax soo saarka ilaa C-Suite.

Xubinimada shirkadu waxay shaqaalaha PCB siin doontaa fursad ay ku biiraan kooxyaha WiM ee maxalliga ah, inay marin u helaan maktabaddooda waxbarasho ee casriga ah, xarunta kheyraadka iyo waxyaabo kale oo badan. Shaqaalaha danaynaya waa in ay Julie Kindelspire, oo ah Saynisyahanka Sare ee Waaxda R&D PCB, iimayl ugu diraan jykindelspire@postholdings.com si ay u helaan wixii macluumaad dheeraad ah.

WAQTIGAN XAADIRKA AH

**20,000+**

**Xubnaha gaarka ah**

WAKIIL KA AH

**3,000+**

**Shirkado oo shirkadaha wax soo saarka ah**

*waxay ku biireen darajooyinka sii kordhaya ee xirfadlayaasha warshadaha ka kala socda* ***48 gobol oo Maraykanka ah*** *iyo* ***47 wadan.***